

## Xeerka Ku dalacida Cuntooyinka Dugsiga DCSD waa la Sharaxay

Waxaa jira laba dugsi degmeed ee ku yaalo Gobolka, Georgia: Dugsiyada Caasimada Decatur iyo Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb (DCSD).

DCSD waxay siisaasaa cuntooyin caafimaadan oo nafaqo ah ardaydoo dhan maalin walboo dugsi. Waa dhaqanka soo jireenka ah ee guud ahaan dugsiyada DCSD in quracda, qadada, iyo fursadaha cuntada fudud ay heli karaan arday walba iyadoon jirin wax ka bedel ama badelka kale ee dooqyada dalabka, iyadoon laga eegin awoodooda ay ku bixiyaan ama ku dheelitiraan akoonkooda dalacaada.

Qarashaadka dalabka waa la qoraa, iyo qadada lacagta la bixiyay ee qoysaska waxay helaan ogeysiinada baaqiga isbuuclaha ah. Lacag bixinada waxaa la sameyn karaa sannad dugsiyeedkoo dhan.

DCSD waxay leedahay in ka badan boqolkiiba 82% oo ardayda u qalma cuntada Bilaashka ah iyo La qiimo dhimay. Degmada waxaa ka go'an inay si naxariis leh ula shaqeyso qoysaska si ay u qanciyaan qarashyada laga sugayo iyagoo la siinayo qorshooyinka lacag bixinta, maalgelinta bulshada, ama barnaamijyada dowlada si loo yareeyo ama gabi ahaanba loo daboolo baaqiyada cuntada.